FÄRDTJÄNST
(ADEEGA GAADIIKA SAFARKA)
ee magaalada Borås

DALBASHADA IYO BAAJINTA SOCDAALADA

Telefoon ku wac xarunta dalbashada:

033-35 50 50

Maalmaha shaqada: 06.00-23.00
Maalmaha fasaxa: 07.00-23.00

Haddii ay wax dhibaatooyin ah ka yimaadaan dalab la sameeyey xilliyada ka baxsan saacadaha caadiga ah ee furitaanka, ayaa toos laguugu gudbinayaa qeybta heeganka.

TUSMADA

TANI WAA ADEEG GAADIIDKA SAFARKA 3

IN LAGU SAFRO ADEEG GAADIIDKA SAFARKA 5

DALBASHADA ADEEG GAADIIDKA SAFARKA 8

DALBASHADA ADEEG GAADIIDKA SAFARKA 9

SAFARADA KALE 11

ADIGA MACLUUMAADKAAGA SHAKHSIGA 13

Tani waa adeega gaadiidka safarka

ADEEG GAADIIDKA SAFARKA

Adeega gaadiidka safarka waa nooc ka mid ah gaadiidka dadweynaha oo kaabaaya gaadiidka dadweynaha ee guud.

Magaalad Borås ayaanu sidaas darteed leenahay macaamiisha adeegga gaadiidka safarka. Taasi micnaheedu waxa weeye inaad la safri karto dadka kale ee laga yaabo inaad isku meel u socotaan iyo inaanad markasta lagu geyn doonin meesha ugu dhow meesha aad u safrayso.

XAALADA ADEEGA GAADIIDKA SAFARKA

Warqadaada ogolaanshahaaga/ruqsada adeegga safarka waxa ku dhigan inta ay shaqeynayso iyo haddii aad xaq u leedahay in wehel kula raacaayo safarka.

Waa mas'uuliyadda macmiilka inuu isagu wixii cusbooneysiin ee ruqsada ah dalbado. Had iyo jeer waa inaad sidato ruqsaddaada adeegga gaadiida safarka markaad safreyso, waa inaad tusi karto darawalka iyadoo uu la socdo aqoonsi sawir leh.

Baahiyaha gaarka sida in gaari kali la raaco, kursiga hore iyo wehelka safarka ayuu si gaar ah u qiimeynayaa wakiilkaaga adeega gaadiidka safarku.

Ruqsadda gaadiidka adeegga safarka ayaa dib loo eegi karaa haddii aad yeelato fursada aad ugu safraysid gaadiidka dadweynaha. Waa inaad wakiilka adeega gaadiidka safarka wargaliso wixii isbeddel ah ee la xiriira ruqsadda.

Tani waa adeega gaadiidka safarka

Ruqsada adeega gaadiidka safarka ayaa lagaa qaadi karaa haddii aad geysatey xadgudubyo waaweyn ama aad si joogto ah ugu jabiso xeerarka iyo shuruudaha adeegga gaadiidka safarka.

Haddii aad saameyn ku sameyso amniga xaalada safarka ama goobta shaqada ee dirawalka xilliga lagu gudo jiro safarka, ayaa qandaraaslahu uu xaq u leeyahay inuu diido inuu ku kaxeeyo.

In lagu safro adeega gaadiidka safarka

WADA SAFARKA

Waxaad safri ilaa inta aad doonto ee aad u baahan tahay haddii baabuur jirto. Waxaad safri kartaa inta u dhexeysa 05.30 ilaa 24.00 maalmaha shaqada ilaa inta saacada 02:45 habeennimo ee Sabtida iyo Axadda. Fadlan ogsoonow in safarka la wato kursiga curyaanka ee saacada ka danbeeya 23:00 maalmaha fasaxa/dhamaadka tobodaadka ay tahay in la xejisto ugu danbeyn jimce saacadda 16.00. Haddii aadan haysan waqti gaar ah oo aad ilaalineyso ayaanu kugula talineynaa in aad safartid maalmaha shaqada inta u dhaxeysa 10.00 - 14.00 si aad si sahlan ugu heshid wakhtiga socdaalkaaga. Si aad ugu hesho isuxidhka ugu weyn ee safarada waa in aad albaabka hortiisa taagan tahay oo aad diyaar u tahay inaad baxdo wakhtiga ballanta ah. Maamulka farsamada ayaa waxay xaq u leeyihiin inay safarkaaga dib u dhigaan ilaa 10 daqiiqo laga soo bilaabaayo wakhtiga lagu heshiiyey iyadoo aan lagu ogeysiin.

GOOBTA AAD U SAFRAYSO

Wax aad u safri kartaa kamuunka dhexdiisa iyo 10 kiiloomitir gudaha kamuunada deriska ah ee kale haddii mid ka mid ah cinwaanada uu ku yaalo kamuunka Borås. Haddii uu safarkaagu yahay meel ka baxsan xadka 10 km ah, ayaa waxaad dalban kartaa kordhinta adeegga safarka gaadiidka. Waxaad markaas bixineysaa khidmadda u dhiganta kharashka qiimaha saacada tagsiga ee masaafadaas. Ma bedeli katid goobata aad u safreyso xilliga lagu guddo jiro safarka. Gaarigu meelna ma istaagaayo inta uu dariiqa ku jiro isagoo aan ku sugeynin marka aad hawl qabsaneyso. Taas waxa ka reeban booqashooyinka gaaban ee lagu sameynaayo xabaalaha, kaashka mashiinka lacag lagala soo baxaayo, ka soo qaadista iyo geynta carruurta ee xannaanada iyo dugsiga. Xilliyadaas, waxaad sheegeysaa inaad rabto waxa loo yaqaano safarka la sii maraayo iyada oo khidmadda cusub lagaa qaadi doonaa

In lagu safro adeega gaadiidka safarka

DADKA KULA SAFRAAYA

Marka aad ku safreyso adeega gaadiidka safarka ayaad haysataa inay kula safraan hal qof ama wax ka badan. Dadka kula safrayaa waxay bixinayaan qiimaha la midka ah ta qofka haysta adeega gaadiidka safarka iyagoo markaa raacaaya haddii boos loo helo. Markasta sheeg marka aad dalbanayso safarka haddii aad haysato dad kula safraaya. Dadka kula safraayaa waa inaanay keenin inay dheeraato masaafadda safar ku jira adeega safarka gaadiidka.

WEHELKA

Darawalku wuxuu kaa caawin karaa suunka, wuxuu kaa caawin karaa laga bilaabo albaabka/irida ilaa aad gaadhiga ka soo fuuleyso, iyo sidoo kale inuu kaa caawiyo qalabka lagu socdo iyo bagaashka/boorsooyinka. Haddii ay curyaannimadaada keeneyso inaad u baahan tahay caawimaad dheeraad ah oo intaas ka badan xilliga aad ku jirto safarka, ayaa waxaad codsan kartaa wehel.

Xaq u lahaanshaha wehelka waxa loo eegayaa shakhsi ahaan iyadoo dalabka aad ka sameysanayso wakiilkaaga adeega safarka gaadhiga. Qofka wehelka ah ayay tahay inuu bixiyo caawimada macmiilku u baahan yahay. Qofka isagu haysta adeega gaadiidka safarka ayaan noqon karin wehel. Wehelka la iskuma ogolaanaayo maadaama oo aad u baahan tahay caawimo xilliga safarka ama in caawimo uga baahan tahay in laguu qaado alaabta aad soo gadatey.

CARRUURTA

Haddii uu kula safraayo ilme ka yar 4 sano jir, ayay tahay adiga masuuliyadaada inaad soo qaadatid kursi carruurta.

In lagu safro adeega gaadiidka safarka

BAGAASHKA

Waxaad soo qaadan kartaa bagaadh u dhigma waxa caadi ahaan baska la isku ogol yahay, waxa loola jeedaa tusaale ahaan bac lagu sido gacan kasta ama boorso. Darawalku wuxuu kaa caawin doonaa inaad bagaashkaaga gudaha gaariga soo galisid iyo dibadda iyo illaa albaabka hore aad geysid.

XAWAYAANKA GURIGA

Waxaad sii kaxeysan kartaa xayawaankaaga baabuurka rakaabka, kaas oo aad markaa ku rakibi karto qaybta boorsada. Kharash u dhigma midka qofka kale ee kula safraaya ayaa la goosanayaa. Waxba kharash lagaama qaadaayo wixii eyda dadka hagga ah. Markasta sheeg marka aad dalbanayso safarka haddii ay haysato eyda daka hagga oo kula safraaya.

SAFARKA GAADHIGA CURYAANKA EE ADEEGA GAADIIDKA SAFARKA

Qofka wata kursiga curyaanka ee raacaaya baska adeega gaadiika safarka ayaa markasta lagu geynayaa oo lagaa soo qaadi doonaa gudaha guriga. Macmiilka ayaa ka masuul ah inuu hubiyo in gaadhiga curyaanku yahay mid amaan ah. Dirawelku waxa uu masuul ka yahay oo kaliya inuu hubiyo in gaadhiga curyaanka lagu xidho meel amaan ah.

Haddii aad kor ugu fuuleyso ama ka soo degeyso jaranjar waa inay markaa jaranjartu awoodaa in ay qaban karto mashiinka jaranjarada fuula. Waa iyagga cidda sameynaysa fuulista jaranjarada ee qiimeynaysa haddii taasi lagu sameyn karo si ammaan ah. Waxa sidoo kale loo baahan yahay in kursigaaga curyaankaagu uu leeyahay qalabka jaranjarada lagu saaro. Dirawelka adeega safarka gaadiidka ayaan kaalmo bixineynin iyadoo la isticmaalyo jaranjarada caadiga ah.

Dalbashada safarka adeega gaadiidka

DALBASHADA SAFARKA

Waxaad safarkaaga dalban kartaa ilaa 14 maalmood ka hor maalinta safarka adigoo soo wacaaya **033-35 50 50**. Dalbo sidoo kale safarka aad guriga ugu soo laabaneyso haddii ay taasi suurtogal tahay. Haddii aad leedahay wakhtiyo soo noqnoqonaaya oo aad rabto inaad raacdo, tusaale ahaan shaqada ama koorsooyinka, ayaad dalban kartaa safaro joogto ah. Marka aad safar dalbanayso waxaad sheegeysaa waxyaalahan soo socda:

- Lambarka shakhsiga ama lambarka macmiilka
- Xilliga aad rabto inaad u sii safarto-iyo/ama xilliga aad rabto inaad halkaa gaadho
- Cinwaanka saxda ee lagaa soo qaadaayo- iyo cinwaanka lagu geynaayo iyo wixii cinwaano kale ee la sii maraayo ah
- Into qof ee safraysa iyo haddii ay qaar badani xaq u leeyihiin adeega gaadiidka safarka
- Wixii aalad caawimo ah iyo/ama xawyaanka guriga ee ku sii raacaaya.

BAAJINTA

Hubi inaan baajiso haddii aadan safreynin, si aanad booska uga xanibin macaamiisha kale ee adeegga gaadiidka safarka ee u baahan inay safraan. Waaxda farsamada ayaa xaq u leh inay qaataan kharash ilaa 10 laabka kharashka la bixinaayo ah haddii aanad baajin. Kharashka ayaan laakiin la qaadeynin haddii taasi si dhifdhif ah u dhacdo.

DALABKA LAGA SAMEYNAAYO INTERNEDKA

Waxaad ka dalban kartaa oo aad ka baajin kartaa safarkaaga adeega gaadiidka safarka adigoo soo maraaya internedka. Tani waxaad ugu baahan tahay lambarka macmiilka iyo PIN-kaaga kuwaas oo aad markaa ka heli kartid rugta dalbashada.

Bixinta safarka adeega gaadiidka

KHARASHKA

Kharshka gaarka ah ee safarka adeegga gaadiidka waxay u dhigantaa tigidhka halka safar ee gaadiidka dadweynaha. Kala qeybqeybinta soonayaasha ayaa la mid ay ta gaadiidka dadweynaha.

BIILASHA

Bishiiba hal mar ayaad heli doontaa biilka adiga qeybta kharashkaaga ee safaradii bishii hore. Safarada dadka kula safraaya ayaad, markaad dalbanayso dooran kartaa inaad biilkaaga ku darto ama in si toos ah laagu dhiibaayo darawalka kahor inta uusan safarku bilaabmin. Safarka xawyaanka ayaa toos loogu bixinayaa dirawelka. Waxaad kuwaas ku bixin kartaa khaash ama kaadh.

BIILKAAGA KU XIDH AUTOGIRO-DA.

Waxaad boras.se/färdtjänst ka buuxin kartaa diiwaangalita autogiro-da ama nala soo xidhiidh markaas ayaanu mid kuu soo diri doonaa. Su'aalaha ku saabsan autogiro waxa ka jawaabaaya Borås Stads Redovisningsservice iyadoo la isticmaalaayo telefoonka 033-35 72 21 ama 033-35 71 16.

Si aad ugu heshid soo koobitaaan safarada bisha, la soo xidhiidh maareynta fakturafardtjanst@boras.se ama telefoonka 033-35 74 84, maalmaha shaqada saacada 08.00-14.00.

Bixinta safarka adeega gaadiidka

HEERKA XADKA KHARASHKA UGU BADAN

Waxaa jira heerka xadka kharashka ugu badan (högkostnadsgräns), taas oo micnaheedu tahay inaadan bishii waligaa bixineyn wax ka badan khidmadda u dhiganta kaadhka bisha ee gaadiidka dadweynaha. Taasi waxay khuseysaa safarada lagu sameeyo kamuunka dhexdiisa. Intaad kharashka ku dareyso adigu ee safar marmarka ah ee aad ka sameynayso meel ka baxsan xadka kamuunka ayaan lagu daray tan.

Haddii aad qorsheyneyso inaad sameyso safaro badan oo meelo ka baxsan xudduudaha kamuunka muddo hal bil ah ayaad waxaad kor u qaadi kartaa xadka xaddigaaga kharashka ugu badan iyo xataa sidoo kale aad heli doonto inaad hesho in safaradaas laguugu darro kuwa ku jira xadka. Waa inaad markaas marka hore kaaliyahaaga kala soo xiriirto lambarka telefoonka **033-35 74 00.**



Safarada kale

SAFARKA LAGU TAGAAYO KAMUUNKA KALE

Markaad macmiil ka tahay adeega gaadiidka safarka ee Borås Stad ayaad sameyn kartaa safarada taksiyada ee kamuunada kale oo qiime wax lagaa dhimay ah. Waxaanu bixineynaa 50% qiimaha saacada tagsiga wixii safarada kamuunada kale dhexdooda ama inta u dhaxaysa laba kamuun oo isku xuduud ah.

Waxaad adigu safarkaaga toos uga dalbanaysaa shirkadda taksika ah ee aad rabto iyadoo aad lacagta safarka u bixineyso sida safarka taksiyada caadiga ah. Markaa ka dibna ayaad soo direysaa rasiidhyo ay ku caddahay qiimaha iyo inta udhaxaysa cinwaanada/degmooyinka aad u safartay iyadoo ay la socdaan macluumaadka shakhsiga, macluumaadka xidhiidhka- iyo koontada- iyadoo markaa kadib aanu kuu soo celine doono kala badh kharashka. Waxaan kuu soo celintaa lacagta safarada ee ugu badnaan ah saddex bilood jirka ah.

RISIIDHKAAHA U SOO DIR:

Borås Stad
Tekniska förvaltningen/Persontransporter
501 80 Borås.

Safarada kale

GAADIIDKA DADWEYNAHA EE KALE

Marka laguu soo ogolaado adeega gaadiidka safarka ayaad bilaash ku raaceysaa gaadiidka dadweynaha ee magaalda Borås Stad. Si aad taas ugu sameyso, waa inaad tagto Västtrafikbutik oo aad tusto adiga ogolaanshahaaga adeega gaadiidka safarka iyo aqoonsiga sawir leh. Waxaad markaas heleysaa shahaado safarka taas oo aad bilaash ugu safri doontid gaadiidka dadweynaha ilaa inta ay ruqsada ogolaanshaha safarka adeegga gaadiidku shageynayso. Macluumaadka ku saabsan sida uu u shaqeeyo gaadiidka dadweynahu ayaad ka helaysaa Västtrafik.

Macluumaadkaaga shakhsiga

Dhamaan safarada adeega gaadiidka safarka waxa la qorsheynayaa iyadoo la isticmaalaayo kambiyuuter. Waxa xarunta dalbashada laga arki karo waxa ka mid ah:

- Inaad leedahay adeega gaadiidka safarka
- Nooca gaadiidka aad raaci karto
- Haddii aad fuuli karto xagga danbe
- Haddii aad xaq u leedahay wehel.
- Haddii aad haysato qalab aad u waaweyn, sida gaariga lagu socdo ama kursiga curyaanka.

Macluumaadkaas ayaa kaliya lagu qori karaa diiwaanka kaaliyaha adeega gaadiidka safarka. Wargali kaaliyahaaga haddii aad beddesho magacaaga, cinwaankaaga, lambarka telefoonkaaga, ama haddii uu isbeddel ku yimaado naafo nimadaada.

Darawalku wuxuu baabuurka ku heli doonaa qoraal amarka wadista oo kaliya oo leh magacaaga, meesha lagaa soo qaadaayo iyo meesha lagu geynaayo, iyo wixii macluumaad kale ee khaas ah ee muhiimka u ah safarkaaga.

Waxa macluumaadkaaga shakhsiga loo maareynayaa sida waafaqsan Xeerka Macluumaadka Shakhsiga (dataskyddsförordningen). Waxaad boras.se/pub ka akhriyi kartaa wax dheeraad ah oo ku saabsan sida ay Borås Stad u maareyso macluumaadkaaga shakhsiga.

MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Telefoonka kula xidhiidh Waaxda Farsada:

033-35 74 00

Waxaanu kaa caawineynaa:

- Ruqsada adeega gaadiiska safarka
- Qabsashada safarada
- Xeerarka safarada
- Safarka lagu tagaao kamuun kale
- Adeega gaadiidka safarka ee qaranka.

Macluumaadka hadda shageynaaya, xeerarka iyo shuruudaha ayaa markasta laga helayaa boras.se

Ka dhiibo faallooyinkaaga adeegga ku saabsan bogga boras.se/synpunkt.

Farshaxanka: Helena Bergedahl. Qaabeynta iyo dib u habeynta: Elin Larsson. Daabacaada Borås Stads kommuntryckeri 2018